

# 5C ✓ LIISKA WARBIXINTA

Tirinta, Tasmada, Daryeelaha, Qandaraaska, Isgaarsiinta

**Ku qaado Waqtiga Aad ku Dooraneysid  
Waaya aragnimada Daryeelka Carruurta  
iyo Waxbarashada Hore**



Action for Children



# Ma u raadineysaa daryeelka carruurta ilmahaaga, socod-baradka, dugsiga hore ama da'da dugsiga?

Maalin kasta waxaan ka caawinaa waaladiinta inay ka saaraan shaqada malada doorashada daryeelka carruurta.

## Action for Children waxay ka caawin karaan:

- Raadinta daryeelka carruurta waqtiga buuxo iyo waqtiga barkii iyo barnaamijyada barashada hore ee xarumaha shatiyeysan, dugsiyada hore, guryaha daryeelka carruurta qoyska iyo barnaamijyada dugsiga ka hor iyo ka bacdi
- Hagida iyo taageerada loo marayo nidaamka barista daryeelka
- Macluumaadka oo sida loo doorto deegaanka tayeysan eek u haboon qoyskaaga
- 24/7 helitaanka raadinta onleenka



Wixii macluumaad dheeraad ah soo wac 614-224-0222, i-meelka u dir [childcareresources@actionforchildren.org](mailto:childcareresources@actionforchildren.org) ama booqo: [www.actionforchildren.org](http://www.actionforchildren.org)

## Tiri

**Tiri tirada carruurta ee kooxda ku jirto.  
Cabirka koox yar ayaa ka fiican.**

### SHARCIGA OHIO EE GURYAHA DARYEELKA CARRUURTA QOYSKA:

- **Yar:** Ugu badnaan lix carruur, oo ay ku jiraan carruurta uu dhalay daryeel siiyaha oo ka yar lix jir, oo aan ka badneyn sadex carruur ah oo ka yar da'da laba sanno.
- **Balaaran:** Inta u dhaxeysa 7 illaa 12 carruur ah, waa inay shatiyeeyaan gobolka oo ay leeyihiin daryeele siiye labaad.

### SHARCIGA OHIO EE XARUMAHA DARYEELKA CARRUURTA:

#### Hal qof oo weyn oo...

- shan dhallaan ee walba (kayar 12 bilood)
- lix dhallaan (12 illaa 18 bilood)
- toddoba socod barad (18 illaa 30 bilood)
- siddeed socod barad (30 illaa 36 bilood)
- 12 sadex sanno jir ah
- 14 oo afar jir- iyo shan sanno jiro
- 18 oo carruurta da'da dugsiga ka yar 11 jir

Xusuusnow in sharciyada shatiyeynta ay yihiin keliya heerarka ugu yar ee caafimaadka iyo badqabka.

Weydiiso inaad aragtid wargelinta shatiga iyo baaritaanka hadda.



## Tusmada

**Barnaamijyo tayeysan waxay leeyihiin hawlo kala duwan oo ka caawiya carruurta inay koraan oo ay bartaan.**

- Ma jiraan waxyaabo xasiloon oo firfircoon oo carruurta sameyso?
- Meeshu ma tahay nadiif, dhalaal iyo badqab?
- Carruurta miyay u egyihiin kuwo madadaalo qaadanayo?
- Ma jiraan qorsheyaal loogu tallogalay dabka iyo xaaladaha degdega ah?
- Haddii uu shatiyeysanyahay, miyuu barnaamijka leeyahay qiimeynta Heerka Sare ee Tayada (SUTQ)?
- Ku dalxiis oo arag halka uu canugaaga wax ku cunayo, seexanayo oo uu ku ciyaarayo.



## **Daryeel siiyaha**

**Hubi in daryeel siiyaha uu yahay qof aad dareemayso inuu badqab ku haynayo canugaaga oo ka caawin doona in canugaaga uu wax barto.**

- Miyuu daryeel siiyaha jacelyahay la joogista carruurta?
- Waa maxay waayo-aragnimada daryeel siiyaha ee carruurta?
- Miyuu daryeel siiyaha leeyahay tababar gaar ah oo la shaqeeynta carruurta yaryar?
- Miyuu bixiyaha ku jiraa Barnaamijka Cuntada USDA? Bixiyaha kuma dalaci karo USDA cuntooyinka iyo cuntada fudud.
- Sidee ayuu daryeel siiyaha u daboolaa baahiyo walboo gaar ah ee canugaaga uu qabo?



## **Qandaraas**

**Kahor intaadan wax go'aan ah gaarin, codso inaad aragto qandaraaska. Waxaa fiican in wax walba aad qoraal ku haysatid, gaar ahaan macluumaadka ku saabsan kharashyada, wakhtiyada hawlgalka iyo saadadka.**

- Waa maxay kharashka? Barnaamijka miyuu aqbalaa kabka daryeelka carruurta?
- Waa maxay wakhtiyada soo dejinta iyo soo qaadista?
- Waa maxay xeerarka ay carruurta ay raacaan?
- Miyuu maray daryeel siiyaha baaritaanka asalka?
- Saadadkee ayuu waalidka u baahanyahay inuu bixiyo? Saadadkee ayay bixiyaan xarunta ama bixiyaha daryeelka carruurta qoyska?
- Weydii tixraacyada. Uga hadal tixraacyada taleefonka ama qof ahaan ka hor inta aadan saxiixin wax heshiis ah.
- Samee wakhti aad ku imaatid booqasho aan balan laheyn. Xarumaha iyo guryaha waxay leeyihiin xeerka "albaab furan".



## **Isgaarsiinta**

**Waa muhiim in la ogaado sida aad ku heleysid ama aad u siineysid macluumaadka daryeel siiyaha.**

- Ma dareentaa in daryeel siiyaha uu ku dhegeysanayo?
- Sideed ayaad u wadaageysaa macluumaad ku saabsan baahiyaha canugaaga?
- Hubi inuu jiro waqti kuu qorsheysan oo aad kala hadashid daryeel siiyaha maalin kasta. (Tan waxay noqon kartaa markaad dejiso ama soo qaadid canugaaga.)

**Ka hor intaadan go'aansan, hubi in barnaamijka yahay mid ku habboon canugaaga iyo qoyskaaga. Xusuusnow, daryeel siiyaha waa jaalkaaga daryeelka iyo waxbarashada canugaaga.**